CENSO 2020
Condados de Benton y Franklin

# Tirakoobka 2020

# Adiga tiri. Ha lagu tiriyo.

1 ABRIIL
Maalinta Tirakoobka

## 10 daqiiqo su'aalood sano

Waxaa ay qaadataa 10 daqiiqo in lagaga jawaabo 10 su'aalood oo qaabeyn doona maalgashiga bulshadaada muddo 10 sano ah.






**www.bfcensus2020.org**

# Waxaad boostada ku heli doontaa martiqaad

Reer kasta waxaa uu heli doonaa ikhtiyaar uu uga soo jawaabayo online-ka, boostada ama telefoonka. Su'aalaha xog-ururinta online-ka ah iyo kuwa telefoonka ayaa lagu heli doonaa Af Ingiriis iyo 12 luuqadood oo aan Af-Ingiriis ahayn.

| Marka ay taariikhdu tahay ama inta u dhaxeysa: | Waxaad ku heli doontaa sanduuqa boostada ee gurigaaga: |
|---|---|
| 12-20 Maarso | Martiqaad online-ka loogaga jawaabayo Tirakoobka 2020. *(Reeraraha qaarkood ayaa sidoo kale heli doona su'aalaha xog-ururinta oo waraaq ah.)* |
| 16-24 Maarso | Waraaq xasuusin ah. |
| | **Haddii aadan weli ka soo jawaabin:** |
| 26 Maarso-3 Abriil | Kaarka boostada oo xasuusin ah. |
| **1da Abriil** | **Maalinta Tirakoobka** |
| 8-16 Abriil | Waraaq xasuusin ah iyo waraaq xog-ururin ah. |
| 20-27 Abrill | Kaarka boostada oo xasuusin ah oo kama dambeys ah ka hor inta Xafiiska Tirakoobka ee Mareykanka aysan qof ahaan dabagal ugu soo sameyn. |

# Is tiri

Halka aad ku nooshahey oo aad seexato waqtiga intiisa badan laga bilaabo 1 da Abriil, 2020.

**Jawaabahaaga Tirakoobka 2020 waa kuwo ammaan ah, sugan oo uu sharciga ilaaliyo.**

Xafiiska Tirakoobka lama wadaagi doono jawaabahaaga wax maxkamad ah ama hay'ad dowladeed kale, oo ay ka mid yihiin FBI, ICE ama Waaxda Amniga Gudaha.

Xafiiska Tirakoobka **MARNABA**:

- Iimayl kuuma soo diri doono.
- Kuma wayddiin doono lambarkaaga Damaannada Bulshada oo buuxa, magaca awoowaha ee ay hooyadaadu lahaan jirtay, macluumaadka koontadaada bankiga, lacag, ama wax iyaga oo ka wakiil ah xisbi siyaasadeed.
- Kuma wayddiin doonaan in ay yimaadaan gurigaaga.
- Kuuguma hanjabi karaan in lagu xirayo haddii aadan u hoggaansamin.

**www.bfcensus2020.org**